DEPARTMENT OF REVENUE

# Waa maxay xuquudayda ka canshuur-bixiye ahaan?

*Macluumaadka qoraalkan wuxuuu sharraxayaa xuquuqdaada qaarkood marka aad la macaamilaysid Waaxda Canshuuraha Minnesota.*

Waaxda Canshuuraha Minnesota waxay isku xilsaartay in ay taageeraan ka canshuur-bixiye-ahaan.Tani waa qayb ka mida masuuliyaddeenna si loola dhaqmo bixiye-yaasha canshuuraha si caddaalada, eex la'aana ah,iyo si joogtaysan. Ka canshuur-bixie ahaan, waxaa kale oo ku saaraan masuuliyado aasasiya marka aad la shaqeynaysay waaxda.

## Waa maxay masuuliyadaheyga?

- Inaad bixiso macluumaad huffan marka aad xareynayso canshuurta
- Inaad buuxiso canshuurta waqtiga habboon
- Inaad bixiso canshuurtaada waqtiga habboon

## Waa maxay xuquuqda canshuur-bixintayda?

Waxaa kale oo xaq u leedahay:

- In aad heshid ogaysiiska canshuurta iyo biilasha sharraxaya canshuur laguugu leeyahay, ganaaxyada, iyo dulsaarka- iyo sababta.
- In aad ogaato sababta aan kuu weydiinayno macluumaadka iyo waxa dhici doona haddii aadan nasiin macluumaadka.
- In aad dhaqso u heshid, si xushmad leh, iyo su'aalahaaga oo si saxan looga jawaabo.
- In aad filato in aan la kashifiyn macluumaadka aad na siisay, marka laga reebo arrimaha sharcigu oggolyahay keliya.
- In la duubo wareysiga adiga ay kula yeelatay waaxda shaqaalaha haddii aad horey noo soo wargalisay.
- In aad iibsato koobigaa lagaa duubay haddii annagu aan wareysiga adiga kaa duubnay adiguna aadan duuban.
- In aad nagu dacweyso maxkamadda haddii aad rumaysantahay in waxyeellada kaa soo gaaray mid ka mida waaxda shaqaalaha si taxadder la'aana ama si ulakaca iska indhatiray sharciga markii canshuurta laguugu yeeshay la uruurinayay. (Si kastaba, haddii maxkamaddu ay ogaato in dacwaddu tahay mid aan macno weyn lahayn, ama loola jeeday mid wax lagu seetadheeraynayo, maxkamaddu waa ku ganaaxaysaa.)

## Ma heli karaa cid i caawisa?

Haa, waxaa xulan kartaa xisaabiye kasta, qareen, ama qaangaara kale ee wakiil kaaga noqda inta baaristo socoto. Haddii qof kale kaa wakiil yahay, waa in qofkaas aad siisaa oggolaasho qoraala. Buuxi oo saxiix Foomka REV184, Qoraalka Wakaaladda, una dir qaybta kula soo xariirtay.

Foomka REV184 waxa aad ka heli karta:

- Barteenna internetka www.revenue.state.mn.us
- Adigoo waca telefoonadeenna 651-296-3781 ama 1-800-652-9094

- Adigoo qoraal noogu soo dira Minnesota Tax Forms, Mail Station 1421, St. Paul, MN 55146-1421

### Maxaa dhacaya haddii aanan diido lacagta ganaaxa?

Waaxda ayaa kuu soo diraysa Amarka Canshuurta (ogaysiis) in uu jiro ganaax lacageed. Waxa aad naga codsan kartaa in aan kaa yareyno ama baabi'inno ganaaxa adigo xaraynaya ama dib ka bixinaya. Taas waxaa lagu magacaaba "khafiifinta" ganaaxa. Si kastaba, haddii aadan nagu raacsanayn mid kasta oo ganaaxa ka mida – marka laga reebo xaraynta iyo dib-ka-bixinta – xaq waxaad u leedahay in aad racfaan ka qaadato amarka. Tusaalooyinka racfaanka ayaa amarkaada ku dhexjira.

### Sidee ku codsan karaa khafiifinta?

Noo soo qor waraaq aad si faahfaahsan ku sharraxayso sababta aad u aaminsantahay in aad haysatay sababo macquulka ee la xariira xaraynta iyo dib-ka-bixinta.

Codsigaada waa in aad ku keentaa 60 cisho gudahood oo ka bilabata taariikhda ogaysiiska ganaaxa la qoondeeyay. Haddii dalabkaada khafiifinta aad qoraal ahaan ku soo gudbinaysid, nuqul kamida amarka arjigaada soo raaci kuna soona dir cinwaanka:

Appeals and Legal Services
Mail Station 2220
St. Paul, MN 55146-2220

### Maxaa dhacaya marka aan codsado khafiifinta ka bacdi?

Waxaanu tixgalinaynaa codsigaaga waana ku soo diri doonnnaa go'aankeenna.

- **Haddii aanu kaa oggolaanno** in aan kaa yareyno ama lagaa baabi'iyo ganaaxa iyo dulsarka ganaaxa, waa in aad weli sii bixisaa canshuurta iyo dulsaarkeedaba.
- **Haddii aan kaa diidno** codsigaada khafiifinta, racfaan ayaa ka qaadan kartaa diidmadeenna. Markale ma codsan kartid in lagaa khafiifiyo; haddii aad weli nagu diidantahay ganaaxa, waa in aad xaraysaa racfaan. Warqadda diidmada ayaa kuu sheegaysa sida aad racfaanka u qaadanayso.

### Waa sidee haddii aan rumaysnahay in aan lacag-celin xaq uleeyahay?

Xaqa waxaaad u leedahay in aad ku dalbato lacag-celin haddii aad bixisay lacaga ka badan intii laguugu lahaa. Waa inaad keentaa caddayn qorala oo taageeraya dalabkaada. Dalabka lacag-celinta sida badan waxaa la sameeyaa iyadoo la xareeyo wax ka baddalidda canshuur-celinta.

Waxa aad haysataa 3½ sano oo ka soo bilaabata taariikhda canshuur-celintaada asalka la sameeyay. Waqtigaas waa isbaddali karaa sababa la xariira hantidhowrka, hawlaha uruurinta, go'aamada racfaanka, ama waaxda oo adiga ku xareysay canshuur-celinta.

**Xasuus:** Si aad u hesho canshuurta-celinta hantida maguurtada, waa in aad xareeysaa canshuurtaada wixii ku siman bisha Agoosto 15eeda ee sanadka xiga. Intaas wixii ka dambeeya, ma heli doontid canshuur-celin.

## Waxaa kala xariiri kartaa U-doodaha Xuquuqda Canshuur-bixiyaha

Iyadoo ay adagtahay sida markasta aan isugu dayno in aan xallino khilaafadka ka yimaada canshuur-bixiyeyaasha, ayaaa markasta aanan awoodi karin in aan sidaas samayno. Marka ay xaladaahaaso kale jiraan,waxa aad la soo xariiri kartaa Taxpayer Rights Advocate.

| | |
|---|---|
| Telefoonada: | 651-556-6013 ama 1-855-452-0767 (telefoonka lacag-laanta) |
| Iimaylka: | dor.tra@state.mn.us |

## Ilaha

Gal www.revenue.state.mn ama naga soo wac telefoonka 651-556-3000 wixi macluumaad ku saabsan iyo jawaabaha sua'aalaha aad qabtid.